Somalia

IIBMAGALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 1da Agoosto 1889 L. 8

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. haikii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 19 ee 3 Luul. 1989, Oggolaansho Heshiiska Mashruuca Dejinta Qaxootiga ee Farjanno. Bog; 413

SHARCI L. 20 ee 3 Luul. 1989, Oggolaansho Xisaab-xirka Xukuumadda ee sannadka 1988da. » 414

SHARCI L. 21 ee 3 Juun 1989, U rogid Sharci Xeer-Sharci L. 1 ee 8.4.1989. » 415

SHARCI L. 22 ee 3 Juun 1989, U rogid Sharci Xeer-Sharci L. 3 8.4.1989. » 416

SHARCI L. 23 ee 3 Juun 1989, U rogid Sharci Xeer-Sharci L. 4 8.4.1989. » 417

SHARCI L. 24 ee 3 Juun 1989, U rogid Sharci Xeer-Sharci L. 6 8.4.1989. » 418
SHARCI L. 25 ee 3 Juun 1989, U rogid Sharci Xeer-Sharci L. 7 8.4.1989. » 419
SHARCI L. 26 ee 3 Juun 1989, U rogid Sharci Xeer-Sharci L. 8 8.4.1989. » 420
SHARCI L. 27 ee 3 Juun 1989, U rogid Sharci Xeer-Sharci L. 9 8.4.1989. » 421

X E E R

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 45 ee 3 Luul. 1989, Meelmarin Heshiiska Masnruuca Dedejinta Qaxootiga. » 422
XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 46 ee 29 Juun 1989, Kordhinta Canshuuruа Gadista Taargada Baabuurta Rimoorka iyo Mooyaanaa. » 423
XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 47 ee 4 Luul. 1989, Kordhinta Madasha Sharci-dejinta 2aad ee Golaha Shacbiga. » 425
XEER MADAXWEYNAHA JRS L. 48 ee 14 Luul. 1989, Ku soo rogid xukun degdeg ah Dalka J. D. S. » 426
XEER WASAARADDA ARR. GURAHA L. 15 1.6.89, Aqoonsi Jamciyadda Istakuleynta Muslimiinta. » 428
XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 16 27.6.89, Aqoonsi Urur Samafal XSKKCDD. » 429
XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 17 24.6.89, Aqoonsi Urur Samafalka Qaali. » 430

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

MAXKAMADDA G. BANAADIR 18.7.89, Lumid Jeeg War. L. 0435400 ku qoran Sacdiyo Maxamuud Maxamed L. 181 » 431
MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.7.89, Lumid Jeeg War. L. 1566662 ku qoran Maryan Xasan Qasaal L. 182 » 432

MAXKAMADDA G. BANAADIR 29.7.89, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Cali Shariif Maxamed L. 183 » 433

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.7.89, Lumid 6 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Nuur Ibraahim L. 184 » 434

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.7.89, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Mursal Axmed Maxamed L. 185 » 435

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.8.89 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Sheekh Aadan Ismaaciil Xersi L. 186 » 436

MAXKAMADDA G. BANAADIR 30.7.89 Lumid Jeeg War. L. 1072533 ku qoran Cabdi Maxamed Sh. Aadan L. 187 » 437

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.7.89 Lumid Buug Kayd L. 6220 ku qoran Maxamed Axmed Maxamed L. 188 » 438

MAXKAMADDA G BANAADIR 3.8.89 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Maxamed Qorane Xersi L. 189 » 439

MAXKAMADDA G. BANAADIR 3.8.89 Lumid 2 Jeeg War ku qoran Maxamuud Saxardiid Ismaaciil L 190 » 440

MAXKAMADDA G J/HOOSE 2.8.89 Lumid 9 Jeeg War. ku qoran Maxamed Macallin Cali L. 191 » 441

MAXKAMADDA G BANAADIR 30.7.89 Lumid Jeeg War. L. 1010463 ku qoran Axmed Ciise Faarax L. 192 » 442

MAXKAMADDA G BANAADIR 16.7.89 Lumid Jeeg War L. 0438428 kuqoran Kaamilo Xuseen Ibraahim L. 193 » 443

MAXKAMADDA G BANAADIR 27.7.89 Lumid Jeeg War L. 1614797 ku qoran Xaaji Maxamuud Nuur L 194 » 444

MAXKAMADDA G BANAADIR 3.8.89 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdicasiis Cali Guul L. 195 » 445

MAXKAMADDA G. BANAADIR 31.7.89 Lumid Jeeg War L 1014541 ku qoran Caasha Cali Warsame L. L. 196 » 446

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 19, taariikh 3.7.1989: Oggolaansho Heshiiska «Mashruuca Dejinta Qaxootiga ee Farjanno» oo dhex maray JDS iyo Hay'adda Qarammada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga (UNHCR).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shac biga:

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska «Mashruuca Dejinta Qaxootiga ee Farjanno» oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Qarammada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga (UNHCR) oo ay Hay'addu ku bixinevso deeq lacagdeed oo dhan US$ 3,760,000/= (saddex malyan toddoba boqol lixdan kun) oo doolarka Mareykanka ah.

Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho ee Dalka Soomaaliya, taariikhdu markey ahayd 9ka May 1989.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu tilmaamayo Heshiiska ku xusan Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda ka waaqaiinayaal Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxa awood loo siivey in uu meelmariyo Heshiiskan.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.7.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 20, taariikh 3.7.1989: Oggolaansho Xisaab-xirka Xukuumadda ee sannadka 1988da.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga:

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Xisaab-xirka Xukuumadda ee sannadka 1988da, sida ku lifaaqan Sharcigan.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.7.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 21, taariikh 3.6.1989: U rogid sharci, Xeer sharci lambar 1 ee 8.4.1989, kuna saabsan — kordhinta canshuurta socodka baabuurta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer Sharci lambar 1 ee 4.8.89, kuna saabsan kordhin canshuurta socodka baabuurta.

Qod. 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 22, taariikh 3.6.1989: U rogid sharci, Xeer sharci lambar 3 ee 8.4.1989, kuna saabsan abuurid canshuurta lahaanshaha baabuurta yaryar.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer Sharci lambar 3 ee 8.4.89, kuna saabsan abuurid canshuurta lahaanshaha baabuurta yaryar.

Qod. 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharciga lambar 23, taariikh 3.6.1989: U rogid Sharci Xeer sharci lambar 4 ee 8.4.1989, kuna saabsan canshuurta rukhsadda iyo cusbooneysiinta sannadka ee laysinka wadidda baabuurta.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer sharci lambar 4 ee 8.4.89, kuna saabsan canshuurta ruqsadda iyo cusbooneysiinta leysinka wadidda baabuurta ee sannadka.

Qod. 2aad

Sharcigani waxa uu dhaqan gelayaa isla marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 24, taariikh 3.6.1989: U rogid Sharci Xeer Sharci lambar 6 ee 8.4.1989, kuna saabsan wax ka beddelidda canshuurta keenidda (dazio di importazione).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay sharci, Xeer Sharci lambar 6 ee 8.4.89, kuna saabsan wax ka beddelidda canshuurta keenidda (dazio di importazione).

Qod. 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 25, taariikh 3.6.1989: U rogid sharci Xeer shar ci lambar 7 ee 8.4.1989, kuna saabsan dib u habeynta canshuurta diiwaangelinta baabuurta taargada Soomaaliga leh.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer Sharci lambar 7 ee 8.4.89, kuna saabsan dib u habeynta canshuurta diiwaangelinta baabuurta taargada Soomaaliga leh.

Qod. 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa isla marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 26, taariikh 3.6.1989: U rogid sharci Xeer shar ci lambar 8 ee 8.4.1989, kuna saabsan wax ka beddelidda canshuurta boollada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer Sharci lambar 8 ee 8.4.89, kuna saabsan wax ka beddelidda canshuurta boollada.

Qod. 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 27, taariikh 3.6.1989: U rogid Sharci, Xeer Sharci lambar 9 ee 8.4.1989, kuna saabsan wax ka beddelidda canshuurta dhoofidda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shcabiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer Sharci lambar 9 ee 8.4.89, kuna saabsan wax ka beddelidda canshuurta dhoofidda.

Qod. 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gtlayaa isla marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.6.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 45, taariikh 3.7.1989: Meelmarinta Heshiiska Mashruuca dejinta Qaxootiga ee «Farjanno» oo dhexmaray JDS iyo Hay'adda Qarammada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga (UNHCR).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67, faqradda 5 iyo Qod. 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 19 ee 3.7.1989 oo Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiskan;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiska la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska «Mashruuca dejinta Qaxootiga ee Farjanno» oo dhexmaray JDS iyo Hay'adda Qarammada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga (UNHCR), lagu na kala saxiixday magaalada Muqdisho ee Dalka Soomaaliya taariikhdu markay ahayd 9ka May 1989ka.

Qod. 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya awood sharci ah.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 3.7.1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeer Madaxweynaha JDS L. 46 ee 29 Juun 1989: Kordhinta Qiimaha Iibsashada Taargada: Baabuurta, Mootooyinka iyo Xaashiyaha iyo buugaagta daabacan ee Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka Dadweynaha oo baabuurta loo isticmaalo (Targhe automobi e stampati del PRA).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka JDS;
ISAGOO ARKAY: Xeer Madaxweyne Lr. 14 ee 21.1.63;
ISAGOO ARKAY: Xeer Madaxweyne Lr. 36 ee 16.5.81;
ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la kordhiyo qiimaha taargada iyo xaashiyaha daabacan ee Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka Dadweynaha (PRA) oo baabuurta loo isticmaalo.
IYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Maaliyadda iyo Lacagta, islana meeldhigeen Wasiirka Gaadiidka Cirka iyo Dhulka.

Wuxuu soo saarayaa Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

I) Qiimaha Taargada baabuurta, Rimoorkii iyo Mootooyinka waa kan mid walba ku hor qoran:-

a— Taargada Baabuurta	Sh.So.	10.000,00
b— Taargada Rimoorka	»	3.200,00
c— Taargada Mootooyinka	»	3.200,00

Qod. 2aad

I) Qiimaha Buugaagta iyo Xaashiyaha daabacan ee Xafiiska Diiwaangelinta Gaadiidka Dadweynaha (P.R.A.) oo gaadiidka loo isticmaalo (stampati del P.R.A.) waxaa laga dhigay sida mid walba ku hor qoran:

a— Buugga socodka baabuurta (Libretto di circolazione) Sh.So. 500,00.

b— Buugga leysinka waddida baabuurta (Patente di guida) Sh.So. 300,00.

c— Xaashiyo dheeraad ah (foglio complementare) Sh.So. 200,00.

d— Xaashi codsi adeeg (Nota di servizio) Sh.So. 200,00.

Qod. 3aad

Xeerkaan wuxuu bedelayaa Xeer Madaxweyne Lr. 36 ee 16.5.1981 iyo wixii ka soo horjeeda.

Qod. 4aad

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waana in lagu soo saaraa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 29 Juun 1989

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 47, taariikh 4.7.1989: Kordhinta Madasha Sharci-dejinta 2aad ee Golaha Shacbiga.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Go'aannadii Kalfadhiga 5aad Golaha Dhexe Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed ee 2aa Luulyo 1989ka, gaar ahaan qaybihiisii ku saabsanaa nabadgelyada iyo xasilloohida Dalka iyo wax ka beddelidda qaabka doorashada Golayaasha Shacbiga heer Qaran iyo heer degmaba;

MARKUU TIXGELIYEY: In xaaladda nabadgelyo iyo xasillooni ee Gobollada JDS qaarkood ayan saamaxeynin in doorashooyin ka dhacaan, lagama maarmaanna ay tahay in la helo waqti lagu sugo nabadgelyada degaammadaas;

MARKUU TIXGELIYEY: In dhanka kalena ay lagama maarmaan tahay in la helo muddo Xisbiga, Xukuumadda iyo Dadweynuhu ay isugu habeeyaan qaabka tartameed ee cusub ee doorashada Golayaasha Shacbiga;

ISAGOO CUSKANAYA: Qodobka 62aad, faqradda 2aad, ee Dastuurka, dhegeystayna Golaha Dhexe ee XHKS;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa muddo hal sano ah lagu kordhiyey Madasha Sharci-dejinta 2aad ee Golaha Shacbiga iyo muddada xilka Golayaasha Shacbiga ee degaannada.

Qod. 2aad

Sidoo kale waxaa muddo hal sano ah dib loo dhigay waqtigii la qaban lahaa doorashooyinka Golayaasha Shacbiga heer Qaran iyo degaanba.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4.7.1989

MADAXWEYNAHA JDS

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Nuur Ibraahim;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumay Jeegagga War. ee Lambarroodu kala yihiin sidatan:-

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran			Laanta
0673792	50.000	Cabdullaahi	Nuur	Ibraahim	1/Hargeysa
0673793	50.000	»	»	»	»
0673794	50.000	»	»	»	»
0673795	50.000	»	»	»	»
0673796	50.000	»	»	»	»
0673797	50.000	»	»	»	»

lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna wada qoran magaca J.le Cabdullaahi Nuur Ibraahim sida ku cad warqadda lam. 7527ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee lam. kor ku xusan lagana sameeyey Laanta 1aad Hargeysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca Cabdullaahi Nuur Ibraahim.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Hargeysa ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdullaahi Nuur Ibraahim lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Mursal Axmed Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga War. lam. 1648174—1648175 lagana sameeyey Laanta Q.X.G. ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Mursal Axmed Maxamed sida ku cad warqadda lam. 7691 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1648174—1648176 lagana sameeyey Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Mursal Axmed Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Mursal Axmed Maxamed lacagta cadad keedu yahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco aaFfinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 185

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Sahra Xaaji Xuseen Macallin;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga War. Lam. 0247614—0247643 lagana sameeyey Laanta Berbera ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Sheekh Aadan Ismaaciil Xersi sida ku cad warqadda lam. ——— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0247614—0247653 lagana sameeyey Laanta Berbera ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaailyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 1.000.000 kuna qoran magaca Sheekh Aadan Ismaaciil Xersi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Berbera ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Sahra Xaaji Xuseen Macallin lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.000 000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka laga daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.8.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Maxamed Sh. Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1072533 lagana sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Cabdi Maxamed Sh. Aadan sida ku cad warqadda lam. 7690 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1072533 lagana sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Cabdi Maxamed Sh. Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdi Maxamed Sh. Aadan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 187

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Axmed Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Buug Kayd Lam. 6220 iagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 16,998.38 kuna qoran magaca J.le Maxamed Axmed Maxamed sida ku cad warqadda lam. 272 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 6220 [illegible] sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo [illegible]dka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 16,998.38 kuna qoran magaca Maxamer Axmed Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Axmed Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 16,998.38 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horrey sa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 188

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Qorane Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga War. Lam. 0484724—0484723 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna kala jirto lacag kala ah Sh.So. 500.000 iyo Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Qorane Xersi sida ku cad warqadda lam. 7972 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee Lam. 0484724—0484723 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 700.000 kuna qoran magaca Maxamed Qorane Xersi.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamed Qorane Xersi lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 700.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo waeergto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.8.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 189

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qoray Jaalle Maxamuud Saxardiid Ismaaciil;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhaqeen Jeegagga War. 1737883—1737882 lagana sameeyey Laanta Xaruntа ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Maxamuud Saxardiid Ismaaciil sida ku cad warqadda Lam. 7967 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1737883—1737882 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Maxamuud Saxardiid Ismaaciil.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Maxamuu dSaxardiid Ismaaciil lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 3.8.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 190

MAXKAMADDA GOBOLKA JUBBADA HOOSE
Lam. Ord. 402/89.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G.J.HOOSE

HADDUU ARKAY: Codsiga Taariikhdiisu tahay 1.8.1989 ee uu soo qortay Jaalle Maxamed Macallin Cali ee ku saabsan Lumidda Jeegagga Lambarradoodu kala yihiin:-

Jeeg	Lam.	0916962	ku	qoran	Lacag	dhan	Sh.So.	100.000
»	»	0916963	»	»	»	»	»	»	100.000
»	»	0916964	»	»	»	»	»	»	100.000
»	»	0916965	»	»	»	»	»	»	100.000
»	»	0916966	»	»	»	»	»	»	100.000
»	»	0916967	»	»	»	»	»	»	100.000
»	»	0916968	»	»	»	»	»	»	100.000
»	»	0916969	»	»	»	»	»	»	100.000
»	»	0916980	»	»	»	»	»	»	100.000

kuwaasoo laga bixiyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo lana bixiyey 10.7.1989, kuna qoran magaca J.le Maxamed Macallin Cali.

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta iyo Baaritaanka uu qoray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Kismaayo kuna saabsan Baaritaanka 9 kaasi Jeeg ee lambaradoodu sare ku xusan yahay ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 No. 2 iyo inta sare ku xusan.

WAXAA LA FARAYAA

In Sagaalkaasi Jeeg ee Lambaradoodu sare ku xusan yahay ee mid waliba ay ku qoran tahay Lacagta ku hor taal in la Cusboonaysiiyo kadib markii lagu qoro oo lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo la sugaayo mudo 30 casho ah.

Isla markaana Jeegagga cusub ee la samayn doono waa in gacanta laga saaraa Jaalle Maxamed Macallin Cali amaid ka sidata Wakaalad Sharci oo loogu Wakiisho qaadista Jeegaggaasi cusub.

Kismaayo, 2.8.1989

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G.J.HOOSE
(Dr. Maxamuud Axmed Faarax)

L. 191

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Ciise Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In aa dhumay Jeeg War. Lam. 1010463 lagana sameeyey Laanta Xaruntа ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 40.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Ciise Faarax sida ku cad warqadda lam. 7693 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1010463 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 40.000 kuna qoran magaca Axmed Ciise Faarax;

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Axmed Ciise Faarax lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 40.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa finta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 192

MAXKAMADDA CODKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdiraxmaan Xasan Cadow;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0438428 lagana sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Kaamilo Xuseen Ibraahim sida ku cad warqadda lam. 711 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.X.Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0438428 lagana sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 300.000 kuna qoran magaca Kaamilo Xuseen Ibraahim.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wardhiigley ee BangigaGanacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cabdiraxmaan Xuseen Caddow lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka harreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 193

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saciid Cubeyd Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1614797 lagana sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100,000 kuna qoran magaca Xaaji Maxamuud Nuur sida ku cad warqadda lam. 7401 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xissaabaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9 1962. In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1614797

WUXUU XEERIYEY

lagana sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Shs. 100,000 kuna qoran magaca Xaaji Maxamuud Nuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Saciid Cubeyd Faarax lacagta cadadkeedu yahay Sh. So. 100,000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 194

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Shuceyb Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga War. Lam. 1653564—1653566 lagana sameeyey Laanta laad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan min Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Cabdicasiis Cali Guul Axmed sida ku cad warqadda lam. 7810 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydk Soomaaliyeed Q.Xis—Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1653564—1653566 lagana sameeyey Laanta laad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Cabdicasiis Cali Guul Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta laad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka [illegible] 15 maalmood lagu bilaabo maalinta soo baxday [illegible] haddaan hantaag ah lagu keenin.

Muqdisho 3 8 1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saaqa Salaad Warsame;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1014541 lagana sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Caasha Cali Warsame sida ku cad warqadda lam. 7698 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Q.Xis—Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1014541 lagana sameeyey Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Caasha Cali Warsame.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Saaqa Salaad Warsame lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. Lr. [illegible] muddo aan ka yarayn [illegible] Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka [illegible] aan [illegible] ga [illegible]enin.

Muqdisho 31.7.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 196

MAXKAMADDA GOBOLL ABANAADIR
QAYBTA MADANIKA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Cali Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga War. Lambarradoodu kala yihiin sidan hoos ku qoran:

J.W.Lr.	Sh.So.	Magaca ku qoran	Laanta
0425002	500.000	Murtaza Xaaji Jafeel	1aad Xamar
0459079	500.000	Cali Cab/maan Xaaji	5aad Xamar

lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag Sh.So. 1.000.000 sida ku cad warqadda lam. 81670 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku tilmaaman lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 1.000.000 kuna qoran mid walba magaca ku hor qoran.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Axmed Cali Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 1.000.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yaray 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ibraahim Cige Maydhane;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen Jeegagga War. Lam. 0055455—0876740 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 iyo Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Ibraahim Cige Maydhane sida ku cad warqadda lam. 8241 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0055455—0876740 lagana sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 600.000 kuna qoran magaca Jaalle Ibraahim Cige Maydhane.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Ibraahim Cige Maydhane lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 600.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yaray 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.8.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)